

# Habka-Dib-U-eegista cilmi Baarista Bulshada ku Salaysan

SoCap Xogta Kooban ee Cilmi Baarista  
Lambar 2, Luulyo 2025

## Qodobada Muhiimka ah

**Habka Dib-U-eegista Cilmi Baarista Bulshada Ku Saleysan (CRP-yada) waa nooc kamid ah dib u eegista hufnaanta oo si macno badan ula bulshooyinka ku jira habka cilmi baarista.**

Iyadoo la adeegsanaayo CRP-yada, bulshooyinka ayaa si firfircoon u hagaaya oo dib ugu eegaaya habka cilmi baarista. CRP-yada ayaa diirada saaraysa yareynta waxyeellada, adkaynta isla xisaabtanka, xaqiijinta in bulshooyinku ka faai'iideystaan cilmi baarista, iyo adkaynta bulshooyinka si loo go'aansho noocyada mashaariicda cilmi baarista ee la fulinaayo. Waxay qaadan karaan qaabab kala duwan, iyadoo ku xiran qayb ahaan jiritaanka iyo shaqada nidamyada dib u eegista xarumaha degaanka, waxayna markasta noqon kartaa talaabo muhiim ah oo lagu sameeyo dib u eegisyada rasmiga ah.

**Cilmi baadhista bulshadu qaybta ka tahay (CRP) waa cilmi baadhayaashu oga baahantihin in ay fahmaan qaababka aqooneed ee kala duwan iyo in ay la yimaadaan ka go'naansho si iskaashi wax ku ool ah loola yeesho bulshooyinka.**

Farsamooyinka wanaagsan ee muhiimka ah waxaa ku jira dedaallada faafinta la heli karo ee xaqiijinaaya in bulshooyinka doorka ku leh cilmi baarista ay si macno leh u leeyihiin mulkiyada natiijootinka. Tan ayaa u baahan qorsheynta dhammaan mudada uu shaqeynaayo mashruucu, oo ka balaaran naqshada iyo xog uruurinta keliya.

**Caqabadaha guud ee ka dhalan kara CRP-yada waxaa kamid ah: 1) Caqabadaha in la xaqiijiyo ka qaybgal bulsho oo macno leh ; iyo 2) Isku dheelidir la'aanta awooda go'aan gaarista iyo helitaanka khayraadka inta u dhexaysa cilmi baareyaasha iyo bulshooyinka.**

Ka warqabida caqabadahaan iyo qaadista talaabooyinka yareyntooda heerka naqshadeynta iyo dhammaan mashruuca, ayaa naga caawinaysa taageerada cilmi baaris hufan oo macno badan.

# WAA MAXAY HABKA DIB U EEGISTA CILMI BAARISTA BULSHADA KU SALEYSAN?

Habka Dib-U-eegista Cilmi Baarista Bulshada Ku Saleysan (CRP-yada) waa nooc kamid ah dib u eegista hufnaanta oo inta badan khusaysa bulshooyinka cilmi baarista lagu samaynaayo. Waxay muujinayaan qaabka badelka ah ee waxtarka leh ee ku aadan habka dib-u-eegista hufnaanta xarunta oo lagu qanci karo. Qaababka lagu qanci karo ee dib u eegista hufnaanta waxaa si caadi ah loogu sameeyaa jaamacadaha ama xarumaha cilmi baarista, ayagoo badanaa aad looga fogeeyo bulshooyinka qiimaynta tooska ah ku dhacayso ee doorka ku leh cilmi baarista.[1]

CRP-yadu waa qayb kamid ah heerka balaaran ee habka ka qaybgalka cilmi baarista, kuwaas oo tixgeliya bulshooyinku inay yihiin 'curiyaasha isbadelka', kuwaas oo xoojinaaya in cilmi baareyaashu ay tahay inay codsadaan iskaashiga iyo xiriir ay la yeeshaan bulshooyinka badelkii ay samayn lahaayeen cilmi baaris ku aadan ama laga dhex sameeyo bulshada Qaababka ka qaybgelinta cilmi baarista ayaa ku casuuma cilmi baareyaasha iyo bulshooyinka isla abuurista, isla fududaynta, isla-qiimeeyaan, ayna isla baahiyaan cilmi baarista.[2] Qaababka ka qaybgalka ayaa door ka qaata xal u helida isbadellada taariikhaha iyo kuwa hadda jira ee awooda, waxayna ugu danbayn badeli doonaan isku dheelitirnaan la'aanta.

CRP-yadu waxay leeyihiin door gaar ah gudaha cilmi baarista ka qaybgalka si dib loogu eego qorsheyaasha cilmi baarista ee lasoo jeediyay, si loo go'aansho khusaynta iyo ku haboonaanta, loo go'aansho in mashruuc gaar ah ay tahay inuu ogolaansho ka helo bulshada si loo fuliyo, iyo si loogula xisaabtamo cilmi baareyaasha shaqadooda gudaha bulshooyinka.

CRP-yada waxay leeyihiin sadex yool oo tiir dhexaad ah:

- 1) In la xaqiijiyo in cilmi baaristu tahay labadaba mid khusaysa ayna faa'iido u leedahay bulshooyinka;
- 2) In la abuurto 'codka bulsho xoog badan marka la go'aaminaayo daraasaadka la ansixinaayo'; iyo
- 3) In la fudaydiyo fududeeyo fursadaha 'dhisida awooda iyo iskaashiyada cilmibaadhis oo waara.[3]

Waxaa jira sadex nooc oo aasaasi ah oo ah CRP-yada:

## 1. Tilmaamaha cilmi baarista guud:

Qaarkood CRP-yada-yada ayaa abuuray tilmaamaha bulshada ee joogtada. Kuwaani waa 'dukumiinfiyo ay abuureen, lala sameeyay, ama loo sameeyay bulshooyinka si loo qeexo habdhaqanka hufnaanta ama anshaxa cilmi baarista'.[4] Waxay caadiyan socdaan muddo ka badan inta ay socoto daraasad cilmi baaris gaar ah ama mashruuc. Kuwan ayaa si gaar ah muhiim ugu noqon kara bulshooyinka 'sida xad dhaafka ah loogu sameeyo cilmi baarista' halkaas oo daraasad aad u badan lagu sameeyay, badanaana leh mulkiyada bulshada ee cayiman.[5]

## 2. Gudiyada dib u eegista rasmiga ah:

Qaarkood CRP-yada- ayaa u shaqeeya sida gudiyada dib u eegista ee bulshada. Kuwan waa sida gudiyada dib u eegista xarunta ee mideysan (IRBs), laakiin waxay si gaar ah dib ugu eegaan mashaariicda khuseeya bulsho gaar ah, iayagoo xoojinaaya muhiimada cilmi baarista ee bulshadaas. [6] Tan waxaa ku jira abuurista gudiga dib u eegeyaasha ee ka socda bulshada kuwaas oo dib u eegeaya mashaariicda cilmi baarista ayagoo doonaaya wada shaqeyntooda. Waxay diirada saaraan xaqiijinta waafajinta muhiimadaha bulshada iyo dookhyada ka qaybgalka.

## 3. Gudiyada talo bixinta ee gaarka u ah mashruuca:

Mararka qaarkood CRP-yada-yad ayaa u shaqeeya sida gudiyada talo bixinta ee bulshada. Kuwani caadiyan waxaa aasaasa Haayad gaar ah/xarun gaar ah ama deeq cilmi baaris kadib marka maal gelin loo helo.[8] Waxay diirada saaraan qorista ka qaybgaleyaasha, dib u eegista soo jeedinnada cilmi baarista, samaynta wacyi gelin iyo u dareemid gudaha bulshada iyo ahaanshaha isku xiraha mashruuca cilmi baarista gaarka ah iyo bulshada.

1. Glass and Kaufert, 2007; Brunger and Bull, 2011; Cross, Pickering and Hickey, 2015.

2. Kwan and Walsh, 2018; Shore, 2007, p. 32; Cross, Pickering and Hickey, 2015, p. 1008; Chambers, 1994.

3. Shore et al., 2011, p. S362.

4. Doerksen et al., 2024, p. 8.

5. Koen, Wassenaar and Mamotte, 2017.

6. Doerksen et al., 2024.

7. *Ibid.*

# MAXAY CRP-YADU FAA'IIDO U LEEYIHIIN?

## 1. Geli naqshada:

CRP-yada ayaa gacan ka gaysta xaqiijinta matalaada guud ee bulshada ee dib u eegista iyo ansixinta mashaariicda cilmi baarista. Qaababka hore ama gaboobay ee dib u eegista hufnaanta, gudiyada xarumaha ayaa dib u eega oo ansixiya cilmi baarista la qorsheeyay, sida suuragalka ahna dal kale ama qaarad kale oo cilmi baaristu si dhab ah uga dhacayso. Xubnaha bulshada ee cilmi baarista deegaankooda loo qorsheeyay inta ka dhacdo ayaan badanaa door badan ama wax door ahba ku lahayn waxa cilmi baarista lagu sameynaayo, sida loo naqshadeeyo iyo sida loo dhaqan gasho, iyo cida doorka ku leh. CRP-yada ayaa gacan ka gaysan kara xal u helida isku dheelitirnaan la'aanta. Isla markaana ku qasbaysa cilmi baadhayaasha in bulshadu la xisaabtanto.[8]

## 2. Ilaalinta iyo yareynta waxyeelada:

CRP-yada ayaa gacan ka gaysan kara yareynta waxyeelada iyo khataraha wada shaqeynta bulshooyinka qaybta ka ah cilmi baarista. Doorka bulshadu waa muhiim si loo difaaco loona dhawro xuquuqda iyo faya qabka iskaashatada bulshada. Waxay si gaar ah u khusaysaa kiisaska marka cilmi baaristu ay khusayn karto mawduucyada xasaasiga ah ama caadada kasoo horjeeda, khatar gelinayaan xasuusaha xun ama haddii kale waxyeelayn karaan ka qaybgaleyaaasha, ama ay ka qaybgaleyaaasha khatar u gelinayaan aargoosi ama dil ka yimaada bulshooyinkooda. Cilmi baareyaasha dibada ka yimaad ayaa laga yaabaa inaysan fahan fiican ka haysan khatarahaan iyo sida loo yareeyo. CRP-yada waa inay diirada saaraan abuurista xubinnada iyo isku dheelitirka si loo hubiyo isla xisaabtanko iyo yareynta khatarta.[9]

## 3. Lahaanshahanatijoooyinka:

CRP-yada ayaa abuurka kara tilmaamaha ama shuruudaha xaqiijinta in natiijoooyinka cilmi baariska loo baahiyo si macno leh, la heli karo oo hufnaan leh. [10] Xataa marka cilmi baarista loo sameeyo loona dhaqan gasho si hufan, cilmi baadhayaasha ayaa ku fashilmi kara inay si macno leh uga shaqeeyaan una baahiyaan natiijoooyinka cilmi baarista ee ka qaybgaleyaaasha iyo bulshooyinkooda guud, halka kuwa kale ay sidaas ku samayn karaa qaabab aan haboonayn ama qasab ah kuwaas oo sidoodaba abuuraya walaacyo dhanka hufnaanta ah.

## 4. Aqoonsiga iyo taageerida khibrada bulshada:

Qaababka cilmi baarista ka qaybgalka ku dhisan si guud waxay u baahan yihiin aqoonsiga qaababka kala duwan ee waayo aragnimad/khibrada bulshada iyo in ay kaa go'an tahay in bulshada lala kaashado soo saarista aqoonta. CRP-yada si gaar ah waxay door uga qaadan karaan aqoonsiga iyo calaamadinta khibrada deganka - laga bilaabo tasiilaadka mashruuca ilaa ka gudbida arimaha xasaasiga ah ee bulshada - iyo xaqiijinta in tani ay faahfaahiso go'aannada ku aadan hufnaanta iyo anshaxa saxda ah ee cilmi baarista. CRP-yada ayaa sidoo kale gacan ka gaysan kara adkaynta awoodaha jira ee cilmi baarista gudaha bulshooyinka daraasooyinka lagu samaynaayo. CRP-yada ayaa dhiiri gelin kara ama qasab ka dhigi kara maalgashiyada lagu sameeyo tababarka shaqaalaha cilmi baarista qaab taageeraaya awoodooda si ay toos ugu helaan maal gelinta cilmi baarista, ayna uga qaybgalaan, u fuliyaan, ayna u hogaanshaan mashaariicda.[11]

## 5. Suuragalmada cilmibaadhista:

Wada shaqeynta bulshada ee macnaha leh iyo adeegsiga habka CRP ayaa taageeri kara dhaqqan gelinta fudud iyo hawlgallada mashaariicda cilmi baarista, ayagoo aqoonsanaaya caqabadaha ama difaaca ka dhanka ah ka qaybgalka, iyo kor u qaadista qaababka hufnaanta si loo maareeyo kuwaan. CRP-yada ayaa si gaar ah muhiim ugu noqon kara mawduucyada cilmi baaristaada dagaalku saameeyay, dagaalka kadib, iyo amaan darada. Mawduucyada noocaas ah ayaa laga yaabaa inaysan dhisan sharciga heer qaran ee hufnaanta cilmi baarista, kuwa jiri karana waxay noqon karaan kuwo qarsoon, oo keliya ka shaqeeya gudaha ama faro gelin lagu sameeyo. Waxay sidoo kale noqon karaan kuwo u nugul isbadellada degdega ah ee bii'ada, siyaasada, iyo arimaha amaanka oo saamayn kara sida mashruuca cilmi baarista loo samaynaayo.[12] Markasta oo ay suuragal tahay, CRP-yada waa inay noqdaan qaab taageero ah oo lagu dabaqo dhammaan hababka dib-u-eegista hufnaanta ee rasmiga ah ee la heli karo, ayna ku jiraan dib u eegista caalamadiga ah ee xarunta marka la heli karo, si loo taageero wada shaqeynta guud ee bulshada.

8. Shore et al., 2015.

9. *Ibid.*

10. *Ibid.*

11. *Ibid.*

12. Tapscott and Machón, 2024.

# WAA MAXAY TALLAABOYINKA KHUSEEYA ABUURISTA IYO FULINTA HABKA CRP?

Marka jirka CRP aan horey u jirin, tallaabooyinka hoose ayaa la raaci karaa si loo taageero abuuristeeda gudaha bulshada iyo doorkeeda mashruuca cilmi baarista ah. Soo koobidan waxaan inta badan diirada saaraynaa doorarka CRP-yada naqshadaynta iyo dib u eegista mashaariicda lasoo jeediyay, waxaana ku dhiiri gelinaynaa akhristeyaasha inay akhriyaan tasmada guud qaababka ka qaybgalka si hadhoow loo dhaqan gasho, loo baahsho iyo intaas kadib.

## Aqoonsiga cida ay yihiin 'bulshadu'.

Kahor inta aan la samayn hanaanka cilmi baarista, waxaa muhiim ah in si qeexan loo qeexo *yaa ah bulshada*.<sup>[13]</sup> Qeexitaanka bulshada, iyo cida loo tagaayo si ay u noqdaan wakiilada marka aysan CRP markaas jirin, ayaa ku xirnaan doonta su'aalaha guud ee cilmi baarista ee daraasadu doonayso inay jawaab u hesho.

Heer farsamo, cilmi baareyaashu waa inay tixgeliyaan, iayagoo ay jiraan arimo kale oo khuseeya:

1. *Goobta* - bulshadan deegaan ahaan ma waxaa lagu qeexayaa magaalo, tuulo, xaafad, ama aag? iyo.
2. *Dadka* - yay ka kooban tahay bulshada la xiiseynaayo dhinacyada kooxaha ugu muhiimsan ama deegaanada dadka? Waxaa ka sii muhiimsan, cilmi baareyaasha ayaa sidoo kale u baahan inay si taxadar leh u eegaan:
3. *Awooda* - cidee kamid ah bulshada ayaa awood iyo maamul u leh gaarista go'aannada; yaa lagu faquuqaa, lagu sameeyaa cilmi baaris xad dhaaf ah iyo/ama awal laga saari jiray go'aan gaarista; waase maxay tallaabooyinka la qaadi karo si loo xaqiijiyo wada shaqeynta bulshada si ay u noqoto mid loo dhan yahay oo muujinaysa isbadeladan? Su'aasha awooda ayaa muhiim ah una baahan tixgelin taxadar leh. Fahanka qotoda dheer isbadellada awoodaha bulshada ayaa muhiim ah marka loo eego suuragalnimada hanaannada bulshada ku saleysan oo noqonaaya kuwa eex ku jirto ama qayb ahaan eex ah haddii arimahaan aan la tixgelin, iyo in cilmi baaristu ugu danbayn dhibaato keento.

Marka la heli karo, cilmi baareyaashu waa inay soo bandhigaan qiimeynada la heli karo ee mawduuca iyo isdiidada, iyo sidoo kale tasmada gaarka u ah mawduuca ee xasaasiyada isdiidada iyo talaabooyinka ka hortaga waxyeelada. Cilmi baareyaashu waa inay sidoo kale la tashtaan saamileyda degaanka ee lagu aqoonsaday hababka si la iskaga ilaaliyo saamaynada xun ee suurtogalka ah in ay dhacaan.

## Abuurista wada hadalka.

Ka hor inta aan cilmi baaristu bilaaban, wakiilada bulshada iyo cilmi baareyaasha waa inay sameeyaan isdhaafsiyada qiimeynta 1. waxa bulshadu aaminsan tahay in muhiimada lagu saaro dib-u-eegista bulshada?; iyo 2. sida ay tahay in dib u eegista bulshadu ka duwanaato dib u eegista Haayadaha/dawladda ?<sup>[14]</sup> Si tan loo gaaro, CRP waa in ay dhaqan gashaan nidaam wada hadal dhexmara cilmi baareyaasha, kooxaha bulshada, iyo iskaashatada cilmi baarista kuna saabsan naqshada daraasada, baahiyaha bulshada, iyo mabaadii'da hufnaanta kuwaas oo maraaya anshaxa cilmi baarista.<sup>[15]</sup>

tan ayaa ka dhigan dejinta kulannada caadiga ah ama kooxaha dooda oo lala yeesho wakiilada bulshada si looga doodo qaybaha muhiimka ah ee mashruuca (tusaale, naqshada mashruuca, dhaqan gelinta, iyo natiijooyinka). Fikirka ka yimaada kulannada waa in lagu qoraa qodobada kulanka ama qaab kale oo kayd (tusaale, cod la duubay oo u baahan ogolaanshaha dadka laga duubaayo) kadibna lagu dhafaa naqshada iyo natiijooyinka mashruuca.

**Fahamka qotoda-dheer oo ku saabsan awoodaha bulshada waa muhiim, maadaama habka ku saleysan bulshada uu noqon karo mid eexaysan ama dhinac u janjeera haddii arrimahan aan la tixgelin, isla markaana cilmi-baaristu ay ugu dambeyntii waxyeello u geysan karto.**

13. Cross, Pickering and Hickey, 2015, p. 1008; Key, 2017, p. 991.

14. Brunger and Bull, 2011.

15. Cross, Pickering and Hickey, 2015, p. 1012.

# WAA MAXAY TALLAABOYINKA KHUSEEYA ABUURISTA IYO FULINTA HABKA CRP?

## Tixgelinta sugnaanta cilmi baarista lagu taliyay.

Inta dib loo eegaayo cilmi baarista, xubnaha CRP waa in ay tixgeliyaan su'aalaha soo socda:[16]

1. Cilmi baarista lagu taliyay ayaa waafaqsan muhiimada cilmi baarista ee lagu cadeeyay bulshadeena?
2. Bulshadu awood ma u leedahay ka qaybgalka cilmi baarista waqtigan iyo dhammaan mudada uu soconayo mashruuca lagu taliyay? Khayraadka bulshada – ayna ku jiraan waqtiga, khibrada iyo fikradaha – horey diirada ma loo saaray ama ma lagu balaarshay mashaariicda kale ama mashriicda cilmi baarista?
3. Waa maxay suuragalnimada mashruuca lagu taliyay ee samaynta waxyeelada, ama keeni kara cawaaqibka aan loo qasdin (wanaag iyo xumaan) bulshada, iyo cida ay ku dhacayso?
4. Waa maxay faa'iidada mashruuca la soo jeediyay uu u yeelan karo bulshada, iyo dadka saamayntu ku dhacayso?

**Xubnaha CRP waa in ay tixgeliyaan in cilmi baarista lagu taliyay ay waafaqsan tahay muhiimada cilmi baarista ee bulshadu dejisay. Yay u badan tahay inuu ka faa'iideysto, waase maxay suuragalnimada waxyeelada?**

## Aqoonso talaabooyinka yareynaaya caqabadaha ku gudban ka qaybgalka macnaha leh.

Ka qaybgalka adag ee bulshada, labadaba cilmi baarista iyo marar dhif CRP, wxay abuuraysaa dalabaad ku aadan waqtiga xubnaha bulshada, mana ahan in dhammaan xubnuhu ay fursad u heli karaan ka qaybgalka si cadaalad ah oo buuxda sababtaas awgeed. CRP waa in uu tixgeliyaa caqabadaha ka hor istaagi kara ka qaybgalka macnaha leh ee kooxaha kala duwan, iyo noocyada abaal marinnada ku haboon ee dhaqan ahaan xasaasiga ah si xal loogu helo kuwaan habta dib-u-eegista. Si loo tixgeliyo khayraadka, CRP ayaa ku talin kara habooniinta miisaaniyada gunnada, safarka, cuntada, daryeelka carruurta, iyo qarashaadka kale marka la go'aansho inay muhiim u yihiin bulshada.[17] Ilaa heerka suuragalka ah, mashruucu waa inuu dhaqan gashaa miisaaniyad si loo maareeyo gunnooyinka ku haboon dhaqanka iyo qarashaadka muhiimka u ah bulshada si loo smaeyo cilmi baarista.

CRP-yada ayaa sidoo kale talo ka bixinaysa saxnaanta iyo helitaanka xogta, ogolaanshaha iyo agabka guud ee mashruuca, kuwaas oo sida kale ka hor tegi kara ama xadidi kara ka qaybgalka bulshada. Tusaale, CRP ayaa door ka qaadan kara abuurista liiska erayada muhiimka ah si loogu adeegsado marka laga doodaayo cilmi baarista bulshooyinka si loo xaqiijiyo xasaasiyada dhaqanka iyo helitaanka isgaarsiinnada cilmi baarista.

16. Brunger and Bull, 2011, p. 138.  
17. Shore et al., 2015, p. 1297.

# WAA MAXAY FARSAMOYINKA WANAAGSAN EE URURADA IYO CILMI BAAREYAASHA AY TAHAY INAY RAACAAN?

## **Oiimeynta qotoda dheer ee mawduuca iyo fahanka:**

Fahanka in bulshooyinku ay balaaran yihiin, ayna leeyihiin caadooyinkooda gudaha iyo isbadellada awooda. Kuwaan waa in loo waajaha qaab hagaajinaaya ama yareynaaya mabaadiidooda ku aadan habka dib-u-eegista cilmi baarista.[18]

Fahanka qotoda dheer ee bulshadu waa inuu ka horeeyaa wada shaqeynta habka kasta oo dib u eegis bulsho si la iskaga ilaaliyo cawaaqibiyada aan loo qasdin, gaar ahaana marka la daraasaynaayo faquuqa iyo mawduucayada xasaasiga ah ee leh saamaynta kala duwan ee bulshooyinka ku dhacaaya. Tan ayaa lagu gaari karaa in lala tashto khabarada deganka ah ee la isku halayn karo iyo samaileeyda si loo xaqiijiyo talaabooyinka koobaad ee aqoonsiga iyo xoojinta bulshada ee lagu sheego hababka dib u eegista in si taxadar leh loo qaato.

## **Dhisida xiriirka iyo kalsoonida labada dhinac:**

Abuurista kalsoonida labada dhinac ayaa u baahan dedaalka mudada dheer ee iskaashiga iyo xiriir dhisid u dhexeeya cilmi baareyaasha iyo iskaashatada bulshada qaabab badan:

1. Biloowga hore, la shaqeynta saamileeyda muhiimka ah kuwaas oo xiriiro muddo dheer ah la leh bulshada, kuwaas oo ay ku kalsoon yihiin bulshadu, iyo kuwaas oo leh aqoonta mawduuca ee balaaran ayaa biloow u noqon kara wada shaqeyn macno leh.

2. Dhisida kalsoonida ayaa khuseysa 'barashada ka doodista farqiyada' – ayna ku jiraan maaha keliya farqiyada luuqada, laakiin sidoo kale farqiyada dhaqan dhaqaale, deegaan, iyo aasaaska qaabka oo u dhexaysa dhinacyada doorka ku leh.[19]

3. Joogtaynta xiriirka joogtada ah, isku dhafka fursadaha si loo helo fikir bixin joogto ah iyo dabagal, muhiimad saarida aqoonta bulshada, muujinta xiisaha dhabta ah ee faya qabka bulshada iyo qadarinta dhaqankooda, caadooyinkooda, iyo qaababka abuurista aqoonta ayaa dhammaan ah qaybo muhiim ah oo aasaas u ah dhisida kalsooni loo dhan yahay.

4. Ugu danbayntii, dhaqan gelin fududayn dheeraad ah sida ugu macquulsan gudaha naqshada iyo qaabka cilmi baarista ayaa sidoo kale aasaas u ah dhisida kalsooni wadareed.[20] Inkasta oo cilmi baareyaashu ay badanaa ku shaqeeyaan jadwallada shaqada ee aan isbadelin ama cayiman oo ay dejiyaan maal geiyaasha ama lagu doonaayo sababaha tasiilaadka awgood, marka ay suuragal tahay, jadwallada waqtiga iyo qorsheynta waa inay noqdaan kuwa kala duwan, waana in lagu daraa taxadaro haddii waqti dheeraad ah loo baahdo.

Inkasta oo cilmi baareyaashu si aysan ka maarmi karin u jahaan caqabado, waa muhiim in la xoojiyo fududeynta. Dedaallada biloowga hore si loo dhiso kalsoonida guud ayaa si wayn loo liidaa haddii, tusaale ahaan, qorsheyaasha cilmi baarista aysan ahayn kuwo fudud heer ku filan si loo siiyo waqti looga hortago, lagu fahmo oo lagu maareeyo arimaha haddii ay yimaadaan.

## **Raadinta dib u habaynta nidaamka ee mudada dheer:**

Cilmi baareyaashu waa inay sidoo kale raacsadaan isbadelka mudada dheer si loo maareeyo isku dheelitirnaan la'aanta nidaamiga ah ee hababka hufnaanta cilmi baarista ee loo dhan yahay, laga bilaabo xarumahooda gaarka ah.

Qaar badan oo kamid ah caqabadaha ilaa hababka dib u eegista hufnaanta ee loo dhan yahay ayaa ah kuwo nidaami ah qaab ahaan. Cilmi baareyaasha ayaa samayn kara talaabooyinka soo socda si kor loogu qaado heerarka hufnaanta ee cilmi baarista bulshada ku saleysan: 1. qorista waxyaabaha laga barto CRP-yada; 2. istaageerada isdhaafsiyada CRP-yada iyo hababka hufnaanta cilmi baarista ee gudaha xarumaha deegaanka; 3. aqoonsiga fursadaha CRP-yada si ay cod ugu yeeshaan sida hababka xaruntu u shaqeeyaan; iyo/ama 4. fududeynta helitaanka fursadaha maal gelinta ee CRP-yada ee lagu baxsho kanaallada xarunta.[21] Cilmi baareyaasha ayaa sidoo kale isdhaafsan kara xog ku aadan xaqiiqooyinka farsamada ee fulinta cilmi baaris hufan oo leh wada shaqeyn bulsho oo macno leh.[22]

18. Buchanan et al., 2008; Brunger and Bull, 2011; del Campo et al., 2013; Cross, Pickering and Hickey, 2015; Kwan and Walsh, 2018.

19. Cross, Pickering and Hickey, 2015, p. 1015.

20. Ibid, p. 1016.

21. Flicker et al. 2007; Shore et al., 2011.

22. Kwan and Walsh, 2018.

# WAA MAXAY CAQABADHA UGU BADAN, IYO KHALADAADKA SIDEESE LOOGA FOGAAN KARAA?

## **Ka gudbida isbadellada awooda ee bulshada.**

Bulshooyinka ayaan ahayn kuwo qadiimi ah xubnaha, saamileeyda iyo kooxaha kala duwana waxay badanaa leeyihiin xiiseyaal iyo mabaadii' kala duwan. Farqiyadaan ayaa calaamadin kara isbadellada jira ee awooda iyo sinnaan la'aanta, waxayna hagayaan muhiimadaha cilmi baarista ee xubnaha kala duwan. Tusaale, cilmi baarista ku saabsan sinnaan la'aanta waxbarashada iyo helitaanka kooxaha la faquuqo ee caafimaadka ayaa khatar gelin kara awooda ay dhisteen kooxaha awooda haysta, halka dadka laga tirada badan ee isla bulshadaas ay soo dhawayn karaan. Cilmi baareyaashu waa inay si taxadar leh uga fiirsadaan arinta si khaldan u adeegsiga awooda hogaaminta iyo xukunka marka la tixgeliyaayo sida CRP-yada dib ugu eegaan ayna u ansixiyaan cilmi baarista lagu taliyay.[23] Ma jirto tusmo guud oo la xiriira ka gudbida qaybahaan badan, laakiin gelinta waqtiga iyo khayraadka ee hababka isbadellada bulshada iyo su'aalaha xasaasiyada dagaalka, iyo sidoo kale khibrada saamileeyda la isku halayn karo, ayaa ka caawin kara cilmi baareyaasha inay iska ilaaliyaan dib u soo saarista ama uga sii darista cadaalad darada jirtay.

## **Xaqiijinta ogolaanshaha sida dhabta ah loo faahfaahshay.**

Xaqiijinta ogolaanshaha macnaha leh ee faahfaahsan, iyo taxidda hababka ogolaansho raadinta laga bilaabo kuwo guud ilaa kuwo gaar ah, ayaa ah caqabadaha muhiimka ah, ee isku xiran oo ka dhalan kara CRP-yada. Dhanka kale, dhaqdhaqaaqyada xuquuqda loo siman yahay iyo ogolaanshaha bulshada ayaa qusayn kara bulshooyinka qaarkood, inkasta oo habkani kuu kasoo horjeedo habraacyada hunaanta cilmi baarista loo dhan yahay, taas oo muhiimada saarta ogolaanshaha qofka iyo tixgelinta khataraha ku dhacaaya shaqsiyaadka.[24] Ogolaanshaha ku saleysan bulshada ayaa sidoo kale keeni kara arimo la xiriira khataraha kala duwan ee ay waajihi karaan bulshadu si wada jir ah, marka loo eego khataraha ku dhacaaya ka qaybgalaaya shakhsiga ah (kala duwan).[25] Dhanka kale, raadinta oolaanshaha

gaarka ah keliya ayaa ka dhignaan karta in ka qaybgaleyaasha su'aalaha ka qaba cilmi baarista, ama si fiican u fahmay ogolaanshaha ka dib dood ay la yeesheen xubnaha kale ee bulshada, ayaa dareemi kara inaysan awoodin inay su'aal ka keenaan ama la murmaan cilmi baareyaasha, gaar ahaana marka isku dheeli tirnaan la'aanta awoodeed ka jirto kooxda cilmi baarista iyo bulshada.

Qaababka eegaaya ogolaanshaha heerarka kala duwan, iyo marxaladaha kala duwan, ayaa ka caawin kara cilmi baareyaasha fahanka arintaan. [26] Xaqiijinta in ka qaybgaleyaashu ay sidoo kale yaqaanaan ayna dareemayaan qanaaco ku aadan ku dhaqanka xuquuqdooda ka bixida naftooda iyo doorkooda daraasada iyo xadidaadaha arintaan - sida jadwalka natiijooyinka lagu daabici doono - ayaa sidoo kale ka caawinaaya xaqiijinta in ogolaanshuhu tahay mid macno leh oo si firfircoon loo qabtay. [27]

## **Xal u helida isbadellada awoodaha.**

Isku dheelitirnaan la'aanta awooda cilmi baarista bulshada ayaa ah qabado kale oo ay tahay in CRP-yada tixgeliso. Kuwaan waxaa ku jiri kara farqiyada awooda go'aan gaarista, aasaaska dhaqan dhaqaale, helitaanka khayraadka xarunta, faa'iidada dhaqaale, iyo faa'iidooyinka mashruuca ee u dhexeeya cilmi baareyaasha iyo iskaashatada bulshada. Daraasaadka ayaa badanaa si ku filan muujin 'cadaalad darada hore' iyo muhiimada doorarka loo siman yahay ee miisaaniyada iyo khyaraadka marka la dejinaayo lana fulinaayo mashaariicda cilmi baarista.[28]

Tusaale, CRP-yada ayaa u baahan muujinta sida ka gudbida farqiyada dhanka dheefaha dhaqaalaha ee u dhexeeya shaqaalaha mushaarka leh iyo kuwa tabaruca ahaan uga shaqeeya mashruuca.[29] Daraasaadka CRP aa in ay tixgeliyaan samaynta doodo hufan oo furan oo la xiriira caqabadaha ku aadan gaarista iskaashi loo siman yahay, ayna u furnaadaan 'wada hadalka isbadellada awooda', ayna ku jirto dib u qaybinta khayraadka iyo dheefaha mashruuca.[30]

23. Glass and Kaufert, 2007.

24. *Ibid.*; Shore et al., 2011.

25. Key, 2017, p. 995.

26. Kwan and Walsh, 2018, p. 379.

27. *Ibid.*

28. Flicker et al., 2007, p. 485; Kwan and Walsh, 2018.

29. Flicker et al., 2007.

30. Kwan and Walsh, 2018, pp. 370, 376.

# TIXRAACYADA

Brunger, F. and Bull, J. (2011) 'Whose Agenda Is It? Regulating Health Research Ethics in Labrador', *Études Inuit Studies*, 35(1/2), pp. 127-142.

Buchanan, D. et al. (2008) 'Assuring Adequate Protections in International Health Research: A Principled Justification and Practical Recommendations for the Role of Community Oversight', *Public Health Ethics*, 1(3), pp. 246-257.

del Campo, F.M. et al. (2013) 'The Development of the Bronx Community Research Review Board: A Pilot Feasibility Project for a Model of Community Consultation', *Progress in Community Health Partnerships*, 7(3), pp. 341-52.

Chambers, R. (1994). *Paradigm Shifts and the Practice of Participatory Research and Development*. Institute of Development Studies, Working Paper No. 2.

Cross, J.E., Pickering, K. and Hickey, M. (2015) 'Community-Based Participatory Research, Ethics, and Institutional Review Boards: Untying a Gordian Knot', *Critical Sociology*, 41(7-8), pp. 1007-1026.

Doerksen, E. et al. (2024) 'Community-Led Approaches to Research Governance: A Scoping Review of Strategies', *Research Ethics*, epub ahead of print, doi: 10.1177/17470161241269154.

Flicker, S. et al. (2007) 'Ethical Dilemmas in Community-Based Participatory Research: Recommendations for Institutional Review Boards', *Journal of Urban Health*, 84(4), pp. 478-93.

Glass, K.C. and Kaufert, J. (2007) 'Research Ethics Review and Aboriginal Community Values: Can the Two be Reconciled?', *Journal of Empirical Research on Human Research Ethics*, 2(2), pp. 25-40.

Key, K.D. (2017) 'Expanding Ethics Review Processes to Include Community-Level Protections: A Case Study from Flint, Michigan', *AMA Journal of Ethics*, 19(10), pp. 989-998.

Koen, J., Wassenaar, D., & Mamotte, N. (2017). 'The "Over-researched Community": An Ethics Analysis of Stakeholder Views at Two South African HIV Prevention Research Sites', *Social Science & Medicine*, 194, pp. 1-9.

Kwan, C. and Walsh, C.A. (2018) 'Ethical Issues in Conducting Community-Based Participatory Research: A Narrative Review of the Literature', *The Qualitative Report*, 23(2), pp. 369-386.

Shore, N. (2007) 'Community-Based Participatory Research and the Ethics Review Process', *Journal of Empirical Research on Human Research Ethics: An International Journal*, 2(1), pp. 31-41.

Shore, N. et al. (2011) 'Understanding Community-Based Processes for Research Ethics Review: A National Study', *American Journal of Public Health*, 101(S1), pp. S359-64.

Shore, N. et al. (2015) 'Community-Based Review of Research Across Diverse Community Contexts: Key Characteristics, Critical Issues, and Future Directions', *American Journal of Public Health*, 105(7), pp. 1294-1301.

Tapscott, R. and Machón, D.R. (2024) 'Procedural Ethics for Social Science Research: Introducing the Research Ethics Governance Dataset', *Journal of Peace Research*, epub ahead of print, doi: 10.1177/00223433241249352.

# Xog ku saabsan Mashruuca SoCap Project

Mashruuca Doorka Xiriirka Bulshada ee Arimaha Burburka iyo Dagaalka Magaalladu dhaliyeen (SoCap) waa mashruuc cilmi baaris sadex sano socday oo ay maal gelisay Irish Aid laguna fuliyay iskaashi lala sameeyay Concern Worldwide. Wuxuu si nidaami ah u qiimeynayaa isdhexgallada u dhexeeya xiriirka bulshada, adkaysiga, bii'ada magaallada, iyo dagaalka iyo khalkhalka ka jira bulshooyinka magaallada ee la faquuqo ee wadamada Haiti, Somalia iyo Somaliland.

Cilmi baaristaan qaababka isku dhafan leh waxay diirada saaraysaa fahanka sida tubaha dhaliya xiriirada bulshada oo noqda adkaysi u dhexeeya kooxaha magaallada ee la faquuqo labadaba loo ilaaliyo loona adkeeyo, si loo aqoonsado qodobada farsamo ee muhiimka u ah fuliyaasha shaqada iyo xeerka.

Kooxda cilmi baarista waxaa ku jira Jessica Hsu iyo Robillard Louino, Gwoup Konbit, Haiti; Manar Zaki and Brenton Peterson, Consilient, Somalia iyo Somaliland; Dr Kelsey Gleason, University of Vermont; Dr Ronak Patel, Nova Frontlines; iyo Dr Caitriona Dowd iyo Dr Kelsey Rhude, University College Dublin.

Fikradaha, ra'yiyada iyo faalooyinka halkaan ku jira gebi ahaanba waa masuuliyada qoraayaasheeda mana matalayaan xeerka Irish Aid.

## Sida loosoo xigto meelaha laga soo qaatay daabacaadaan:

Rhude, Kelsey, Jessica Hsu, Robillard Louino, Ronak Patel, Kelsey Gleason iyo Caitriona Dowd. (2025). *Hababka Dib-U-eegista Cilmi Baaris Bulshada Ku Salaysan*. Khlaasada Cilmi Baarista SoCap Research Lambar 2.

**Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan mashruuca SoCap, fadlan booqo: <https://www.concern.net/knowledge-hub/social-capital-and-resilience-fragile-and-conflict-affected-urban-contexts>**

